

## **XEERARKA IYO HABRAACA MAGAC BIXINTA DUGSIGA**

*Wareegtada siyaasaddan waxay khusaysaa oo keliya Sannad Dugsiyeedka 2022- 2023.*

### **GUNDHIG**

Sebteembar 16, 1998, Guddida Dugsiga Boston waxay soo qaateen xeerka magacaabista ama magac beddelitaanka dugsi kasta oo dadweynaha Boston ah ama meel caan ah oo ku dhex yaal (tusaale, maktabad, hoolka shirarka, qolka shirarka, qolka shirarka). Xeerarkan waxaa loo dejiyay si loo hubiyo in shaqaalaha dugsiga, waalidiinta, iyo bulshada ku hareeraysan ay helaan fursado ay ku soo jeediyaan oo ay dib u eegaan magacyada kahor inta aan loo gudbin kormeeraha iyo Guddiga Dugsiga si loo ansixiyo kama dambaysta ah. Marka la ansixiyo dugsi cusub oo la furo, Guddiga dugsigu waxa laga yaabaa inay ansixiyaan magac ku meel gaar ah kaas oo sii jiri doona ilaa inta bulshada dugsiga laga dhisayo oo maamulaha/madaxa dugsigu uu gudo galo habka magacaabista dugsiga oo halkan ku faahfaahsan.

**MAGACAABISTA** Marka bulshada dugsigu ay ku dhaqaaqdo habka magac-bixinta ama magac bedelitaanka, waa mas'uuliyadda maamulaha ama madaxa dugsiga si ay u hubiyaan in dhammaan dhinacyada ay khusayso lagu wargaliyo habka iyo in la siiyo fursado ay kaga qaybgalaan. Talooyinka magaca dugsiga waxa loo gudbin karaa maamulaha mid ka mid ah saddexda ilood:

Xubnaha Guddiga Dugsiga

b. Golayaasha Dugsiga, Goleyaasha Waalidka Dugsiga, Waalidiinta

c. Xubnaha bulshada ama kooxaha bulshada

### **Dhagaysiga Dadweynaha**

Marka la helo talooyinka magacyada cusub ee dugsiga, maamulaha iyo School Site Council waa inay qorsheeyaan oo ay qabtaan dhageysi dadweyne. Ogeysiiska dhageysiga (oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga, goobta iyo ajendaha) waa in lagu dhejiyaa xafiiska karraaniga magaalada, loo gudbiyaa wargeyska maxalliga ah, loo qaybiyaa shaqaalaha, loona diro guriga dhamaan waalidiinta.

Ujeedada dhagaysigu waa in la siiyo kuwa soo jeediyay talooyinka fursad ay ku bixiyaan sabab macquul ah codsigooda iyo inay ka jawaabaan su'aalaha. Dhageysiga sidoo kale wuxuu siinayaa maamulaha iyo golaha goobta dugsiga fursad ay ku dhagaystaan faallooyinka bulshada dugsiga iyo dhinacyada kale ee ay khusayso. Talooyin dheeraad ah ayaa la soo gudbin karaa wakhtiga dhageysiga.

### **SHURUUDAHA IYO TILMAAMAHA**

Shuruudaha soo socda waa in lagu tixgaliyaa marka lala talinayo iyo qaadashada magacyada rasmiga ah ee xarumaha dugsiga: Wareegtada Kormeeraha SUP-4, 2022-2023 Sebteembar 1, 2022 Boga 2 ee 2 bog

1. Magacyada xarumaha waxa laga yaabaa inay sharfaan qofka wax weyn ku soo kordhiyey ama siisay adeeg heersare ah dugsiga, nidaamka dugsiga, qaranka, ama bulshada.
2. Magacyada xarumaha waxa laga yaabaa inay aqoonsadaan qaybta juqraafi ahaaneed ee magaalada uu dugsigu ku yaallo (sida xaaladdu tahay qaar badan oo ka mid ah dugsiyada sare ee degmada).

3. Magacyada xarumaha waxay aqoonsan karaan ujeedada tacliimeed ee dugsiga.
4. Magacyada xarumaha waxa laga yaabaa inay isku-dhafto magaca qofka wax weyn ku soo kordhiyey dugsiga, nidaamka dugsiga, ama bulshada iyo kan mawduuca tacliinta.

Magacyada qolalka gaarka ah ama goobaha dhismayaasha dugsigu waxay sharfi karaan qofka wax ku soo kordhiyey ama bixiyay adeeg heersare ah dugsiga ama bulshada.

### **TALO SOO JEEDINTA**

Maamulaha/madaxa dugsiga iyo School Site Council waxa laga yaabaa inay doortaan inay u codeeyaan soo jeedinta(ada) magac cusub ama waxay u soo gudbin karaan dhawr talo-bixin kormeeraha iyo Guddida Dugsiga si ay u eegaan iyo go'aankooda. Haddii School Site Council uu doorto inay u codeeyaan soo jeedinta, shirka ay codayntu ka dhacayso waa in si weyn loo shaaciyo, sida dhegeysiga sare, ama waxa laga yaabaa inuu ka dhaco dhegeysiga laftiisa. Marka nidaamkan la dhammeeyo, maamulaha/madaxa dugsigu waa inuu u gudbiyaa waxa soo socda maamulaha guud:

1. Ikhtiyaar(yada) ama talada(ooyinka) magacyada dugsiga iyagoo ka wakiil ah School Site Council
2. Nuqul kamid ah ogeysiiska dhegeysiga dadweynaha iyo xisaabta qaybinteeda
3. Go'aanada shirka (haddii ay jiraan) ee cod loo qaaday

Kormeeraha guud waxa uu u soo bandhigi doonaa talada(ooyinka) Guddiga Dugsiga si ay uga doodaan oo ay tallaabo uga qaadaan mid ka mid ah kulamadooda caadiga ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan wareegtadan, la xiriir:

Magaca:	Elizabeth Sullivan, Agaasimaha Xiriirka Ka Dhexeeya Dawladaha
Waaxda:	Waaxda: Xafiiska Kormeeraha guud
Cinwaanka boostada:	2300 Washington Street, 5th Floor, Boston, MA 02119
Telefoonka:	617-635-6402
Fakiska	617-635-9059
Limayl:	esullivan5@bostonpublicschools.org

Mary Skipper, Kormeeraha Guud